## Guudahaan

Sharciga Jarmalku wuxuu qorayaa:

Q1aad: „**Xuquuqda Beni aadamka lama taaban karo**“

Q3.2aad: „**Ragga iyo Dumarku waa isku Xaq**“.

* Macnuhu waa , Qof Dumar ahi, waxay leedahay Xaqa uu Ninku leeyahay, taasina waxay ká dhigantahay, inay Naagwalba Xaq ú leedahay, in Ixtiraam iyo Xushmad loola dhaqmo. Qofna kama horjoosankaro xaqeedaas.
* Kumana xirna Waddanka ay ka imaatay, Dhaqankeeda, Hiddaheeda, ama Diinta ay Citraafsanatay: Dumarka Waddanka Jarmalkajoogaa waa isku Xaq.
* Naagwalba waxay Xaq ú leedahay, inay ú noolaato siday Jeceshahay, inay sí Xor ah ú hadlikarto, ama ú dhaqmikarto iyo inay Xaqeeda ú doodikrato, iyadoon Nin Fasax uga baahnayn.
* Waddanka Jarmalka Sharciyada Shacbiga ayaa Diinta ká horreeya. Sidaas darteed, ayay Qofta Dumarka ahi,ugu dhaqmikartaa, waxyaalo ká soo horjeeda Diinteeda ama Dhaqankeeda.
* Naagwalba oo imaata Waddanka Jarmalka, waxay Xaq ú leedahay inay, keligeed codsato Qaxootinimo. Iyadoon ú baahnayn Ninkeeda oo ú fasaxa, ama Rag ká mit ah Ciddeeda ama Nin iyada keenay. Qofna uma fasaxna, inuu iyada ú hadlo iyadoon Qofkaas ú fasaxin.
* Naagwalba, oo Waddanka Jarmalka Qaxootinimo ká Codsatay,oo (aan weli) Af Jarmal kú hadlin,waxay Xaq ú leedadahay, Qof ú Turjumaa_n Turjumaa_nad ah inay Dawladdu ú qabato. Ballamaha kale ee loo qabto, waxay soo kaxaysankartaa, Qof samafal kú caawiya.
* Naagtiiwalba ee Waddanka Jarmalka Qaxootinom ká codsataa, waxay kú khasbatnatahay, inay ká qaybgasho Iskool/Iskuul Luuqadda iyo Hiddaha Jarmalka lagu barto. Taas oo uusan Ninkeedu ama Qof Ciddeda ká mit ahi iyada ká mamnuucikarin ama ú diidikarin.

## Wax Khatar ah

* Hadii aad Dumar ahaan, Cabsi ama Dhibaato, sida Jirdil oo kale dareento, waa inaad sidii ugu dhakhsobadnayd ú raadsato Caawimo, taas oo aan ahayn wax laga Xishoodo, illeen Qofkii dhibaato dad ú geystay ayaa, Magacxumo kú dhacday, Qofkii dhibaato gaarteyna magacxumo lama kulmidoono.
* Lambarkaan halkaan **08000 - 116 016** soo wac ama garaac, halkaas ayaad ká heleysaa Caawimo ama Talo, há noqoto, Guur khasab ah, ama Jirdil, iyagoo kú hadla Luuqado kala duwan (**www.hilfetelefon.de**).
* Guryaha Dumarku Amaano ká doontaan, waa Guryo loogutalagay, inay Dumar Dhibaato Qofkale gaarsiiyey, amaano ká helaan. Boliis, Kaniisadda iyo Haayadaha Dumarka saacidaaba way ogyihiin, Cinwaankaas qarsoon, ama meesha guryahaasi kú yaallaan, sí naftiinna loo badbaadin karo. Wax kharash ahna kama bixineysaan.

## Xiriir

*Warbixinta halkaan taalla waxay tusaale ahaan, na tusaayaan, waxyaalaha ay ká mityihiin, xuquuqd Dumarka iyo Haweenka.*

..................

Qoraalaha Mudany Birte Vogel,c/o Haaydadda Samafalka ah ee Gobolka Niedersachsen e.V, Röpkestraße 12, 30173 Hannover.

Tarjumay Fadumo Korn.

Sawirka © Jose Antonio Alba.

Waraaqdaan waxaa loogutalagalay, faafinta warbixinta oo keliya.waa mamnuuc in wax cusub lagukordhiyo ama laga bedelo, há ahaato nooca loo daabacay ama informeyshinka kú qoran.

Waxaa keliya oo fasaxan in samafal dadka loo siiyo. Lama ogola in Chatka /Domain lagusoo bandhigay iyadoo wax lagabedeley. Waa sidaan (www.wie-kann-ich-helfen.info). Wixii intaas dhaafsan waa in lagala tashado Qoraalayda soo bandhigtay. Waxaa lex Birte Vogel.



## Iskuul, Xirfadbarasho & Shaqo

- Gabarwalba waxay waxay Xaq ú leedahay kuna khasbantahay, inay ugu yaraan ilaa 9/10 Fasal Iskool/Iskuul dhigatao. Qofna kuma khasbikaro inay Fasalka sagaalaad kú joojiso waxbarashada, haddii nootootyinkeedu wanaagsanyihiin oo ay sii wadikarto waxbarashada.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, oo kala dooran kartaa, markay dhamayso Iskoolka/Iskuula inay Xirfad barato, ama Dugsiga sare ká dib Jaamacad gasho.
- Qofwalba oo Dumar ahi waxay Xaq ú leedahay, inay doorankarto Xirfadda ay dooneyso. Taasna waxay kú xiranatay heerka waxbarashada Dugsiga.
- Qofwalba oo Dumara ahi, waxay Xaq ú leedahay in shaqada ay qabato, Mushaar ú qalma laga siiyo. Qofwalba oo Dumar ahi waxay Xaq ú leedahay, inay lacagta ay shaqaysato iyo Mushaarkeedaba, ay ayadu ú isticmaalikarto sidii iyadu dooneyso. Waxay Xaq ú leedahay inay Bankiga Account ká furato.

## Wakhtiyada aad Fasaxa tahay

- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, inay nolosheeda iyo wakhtiyada ay fasaxantahy, ay samaynkarto wixii ayadu ay jeceshahay. Há ahaato Sport ama Shineemo/Film ama há ahaato inay Baar aado oo ay Khamri Cabto- Góaankaas ayada uun baa gaarikarta.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, inay Habeen ama Maalin há ahaatee, Xilligii ay rabto iyadu Guriga ká bixikartaa, iyadoo keligeed.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaqu leedahay, inay Qofkii ay dooneyso lá hadlikarto. Qofkaasi ama há haado Nin ama Naag, ama Xaas há ahaado ama yuusan ahaan.
- Qofna, xitaa há ahaado Ninkeeda, kuma Khasbikaro iyada, habka ay ú lebisanayso.
- Wax alle waxa ay ayadu doonayso ayay xirankartaa, iyada keligeed ayaa G0áankaas gaarikarta.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, inay ká Goáangaarto, inay Madaxa Dedato/Hagoogato ama Jirkeeda Asturto. Qoftii aan Hagoogan ama Dharka Asturka xiran, má aha inay Qofxun tahay, ama Qof Ceebeysan ay noqoto ama loo qaato.

## Wadasocod/Guurka

- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedaday, inay lá socoto Qofkii ay iyadu ama dookheeda ah oo ay dooneyso, há ká imaado meelwalba, há lahaado Diinkale ama há ahaado Dhedig ama Lab. Qofna uma fasaxna in iyada lagu Khasbo Guur ama Qof aysan dooneyn in loo guuriyo.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, inay ká tagto Ninkeeda haddii ay isfahamdarro kala kulanto.
- Haddii Qof Dumar ahi, Ninkeeda ká tagto, diido ama iska Furto, Wejigu kama lumaayo, ama má ahan Qof xun inay noqoto. Ceebna uma geysanayso Ciddeedii ama Familkeeda. Waa wax ay Xaq ú leedahay oo Xuquuqdeeda Beni aadamka ká mit ah.
- Haddii Naagi Ninkeeda ay Carruur ú dhashay ká tagto, waxaa ú fasaxan, inay Masuulka Barbaarinta Carruurta labadooduba wadaagaan. Taasi waxay ka'dhigantahay inay, labadoodu sí siman ú qaybsadaan, Barbaarinta, Xanaanada iyo Masruufkoodaba. Midkoodna uma fasaxna inuu Carruurta kan kale ú diido ama meelkale/Waddankale lá aado, Haddii aysan Maxkamadi mid Waalidka ká mid ah, ká mamnuucin, inuu Xaaskiisa/keeda ama Carruurta uu arkikaro ama soo booqdo ama ú soo dhawaado.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, in ay Goáan ká gaarto, marka ay Uurqaadayso, ama há lá qabo ama yaan lá qabin. Midda kale waxaa ú fasaxan marmarka qaarkood (Haddi Kufsi ay Uur ká qaaday, ama Nolosheedu Khatar kú jirto) inay iska soo Xaaqi karto Uurkaas.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, inay diido Masuulka, Guriga Nadaafaddiisa ama Xanaaneyta iyo koritaanka Carruurteeda, iyada iyo Aabaha Carruurtu isku Xaq yihiin, Ninkuna kú khasbanyahay inuu Intiisa ká soo baxo Sida Xaaskiisa oo kale.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, xagga Xanaanayta iyo Asluubta Carruurta inay iyada iyo Ninkeedu isku Xaq yihiin, wixii Naagtiisu diidana kuma khasbikaro.

## Ninnimada iyo Naagnimada

- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, inay lá seexato qofkii ay jeceshay, kumana xirna inuu ahaado Nuin, Naag, Wadankiisa ama Diintiisatoona.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, inaan lagu Khasbikarin, inay Nin lá seexato. Waana Mamnuuc in Nin iyada kú khasbo waxyaalo aysan raalli ká ahayn, ama há isqabaan ama yaysan isqabin. Wayna Dacwenykartaa Qofkii Khasba, xitaa há aahdo Ninkeeda.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, inay iska Difaacdo Cudurrada laysqaasiiyo iyo Uur aysan diyaar u'ahaynba, xitaa há ahaado Ninkeeda.
- Kufsigu Guudahaan, (xitaa ninkeeda há ahaadee) waa Dembi weyn, oo Xukun Maxkamadeed ká dambeeyo.
- Inay Gabdhuhu ama Dumarku, gabar tahay (Bikirjab) iyo in kale, maha shrafdarro ama in lá guursan karo iyo in kale. In ay tahay weli Gabar iyo in kale, Qofta Dumarka ayaa Goáan ka gaarikarta.

## Caafimaadka

- Waddanka Jarmalka waa ká mamnuuc, há ahaadeen Qof ká mid ah, Ciddeeda ama Qof qalaad, waa Mamnuuc in Dumarka ama Gabdhaha lá handado,lá cadaadiyo, in loo dhaarto, ama lá dilo, Jir dil ama Niyad dilba há ahaatee.
- Qofwalba oo Dumar ahi, waxay Xaq ú leedahay, inay Dacweyso qofkii iyada Dhaawac gaarsiiya, há ahadeen Rag ama Dumar, Ninkeeda ama Ciddeedaba. Boliiskuna wuu kú khasbanyahay inay dembigaas daba galaan.
- Guudahaan waxay Dumarku Xaq ú leeyihiin, inay Caafimaad helaan, há ahaato Jir ahaan, Niyad ama Maskaxahaanba. Iyadoo Xaq ú leh, inay Dhakhtarka ay dooneyso doorankarto. Qofna Xaq uma laha in iyada Caafimaadkeeda Goáan loo gaaro, há ahaato Ninkeeda ama Ciddeedaba.
- Waa Mamnuuc in Caafimaadka Gabdhaha wax lá gaarsiiyo, sida Gudniinka Ghabdha oo kale, há ahaato inay diintio sababayneyso iyo in Kaleba, Sharcigu má ogogla.